

**MUSIC MAGIC: Ku dhiirogelinta Hip-Hop in lagu Xoojiyo**  
**Xirfadaha Farbarashada Ardayda ee Dugsiga Marbut**  
**Traditional Theme**

Maadaama ay hip-hop u dabaaldegeyso sannad guuradeeda 50aad, arday badan ayaa ku raaxeysto dhageysiga hip-hop-ka casriga ah laakiin aan laheyn aqoonta ku saabsan taariiqdeeda hormuudnimo. Andre Mountain, maamulaha Dugsiga Marbut Traditional Theme, waxaa ka go'an inuu bedelo midaas oo uu xoojiyo awoodaha farbarashada ardaydiisa ee socdo.

Maamule Mountain iyo kooxdiiisa ayaa si guul ah u aasaasay *Hip Hop Literacy Laboratory*, ee ku saleysan [HipHopEX Laboratory](#) ee Jaamacada Harvard. Waa fasal xooga saaraya howlaha ku saleysan farbarashada oo ay dhiirogeliso suugaanta Afrikaanka Ameerikaanka ah iyo waxbarashada farshaxanka ku saleysan. Ardayda waxay ku milmeen qoraal hal abuur leh, waxbarashooyinka buugga, iyo fursadaha kale ee waxbarashada ee farshaxanada Hip-Hop ay bixin karaan. Yoolka ugu dambeeyo ee *Hip Hop Literacy Laboratory* waa siinta ardayda ka qalin jabisay dugsiga sare iyo kuwa deegaanka barnaamij ay ku sahmiyaan oo ku tijaabiyaan farshaxanada Hip-Hop-ka ee goobaha waxbarashada kala duwan.

Barnaamijka waa meel heer sare u ah ardayda iyo macalimiinta oo ay isugu yimaadaan oo ay ku falanqeeyaan mawduucyada sida farbarashada, dhaqanka magaalada iyo dhalinyarada, iyo cadaalada bulshada. Sida Maamule Mountain uu ku sharaxay, dhinaca ka qeybgelinta wadahadalada, aqrinta qoraalada quseeya, iyo abuurida farshaxa, qof walba wuxuu ka faa'idi karaa qibrada iskaashiga yo waxbarashada.

"Hip-hop waa gabay casri ah; waa suugaanta, oo waxaan rabnaa inaan ka faa'iidaysano waxa ay ardayda xiiseeyaan. Kuwa badan oo ardaydeena ah ayaa soo jiitay oo la dhacsan dhaqanka hip-hop," Mountain ayaa yiri. "Dugsi ahaan, waxaan u aragnaa taas fursad lagu kordhinayo ka qeybgalka ardayga iyo muranka waxa ku jiro manhajka. Marka, waxaan ku buuxinaa manhajka waxyaabaha soo nooleysiinayo ardayda."

Taariiqaha bilowga barnaamijka oo soconayo sannad iyadoo ay ardayda ku soo noqdeen dugsiga kadib xiritaanka cudurka safmarka ee COVID-19. Shaqaalaha dugsiga waxay raadiyeen qaab waxtar u leh oo ay dib ugu soo nooleeyaan jaceylka ardayda ee aqrinta. Fikradaan barnaamijkaan waxay soo bandhigtay fursad rajo leh oo lagu kordhinayo ka qeybgelinta ardayda. Iyo aasaaskaas fudud, fasalka aan la isticmaalin ayaa loo bedelay meel firfircoon oo lagu qurxiyey boorarka iyo farshaxano u dabaaldegaya fannaaniinta hip-hop.

"Markii aan eegno fasalkaan, waxaad arkeysaa matalaada dhaqanka magaalooyinka, waayo aragnimada Afrikaanka Ameerikaanka ah oo qolkoo dhan ah," Mountain ayaa yiri. "Taasi waa waxa aan u rabnay caruurteena—barnaamij ay ku abuuri karaan, qaladaad ku sameeyaan, ku wadahadlaan oo ay ku doodaan. Ma aha fasal caadi ah; waa wax aan caadi ka aheyn dugsiga mawduuca dhaqanka."

Barayaasha waxaa lagu dhiirogelinaya inay ka faa'ideystaan fursada ay uga diiwaangeliyan ardaydooda booqashada barnaamijka. Waxay hayaan iqtiyarka ay ku hogaamiyaan casharka ama ay ku qoraan caawinta macalin kale. Kaaliyaha xarunta warbaahinta ayaa sidoo kale diyaar u ah inuu ardayda ka caawiyo baahidooda farbarashada. Inta lagu jiro waayo aragnimadaan, ardaydu waxay helayaan aragtiyo qiimo leh ee taariiqda hip-hop-ka oo ay sifeeyaan awoodahooda farshaxanka. Waxay sidoo kale hayaan fursada lagu falanqeeyo erayada fanaaniinta hip-hop ee caanka ah ee Atlanta, taasoo siineyso fursada waxbarashada dhameystiran oo sifooyinka deegaanka.

"Fannaaniinta Atlanta waxay ka hadlayaan arrimaha bulshada dhabta ah—nolosha qofka dhalinyarada ee ku korayo magaalada Atlanta, "Mountain ayaa yiri. "Ma rabno kaliya inaan sharafno waxa laga abuuray Bronx oo aasaasida hip-hop-ka, laakiin sidoo kale aan sharafno shaabada ay Atlanta saartay dhaqanka hip-hop."

Ardayda fasalka-shannaad London Christen iyo Jase Kurtz ayaa jacel waxa *Hip Hop Literacy Laboratory* ay bixiso.

"Waxaan u jeclahay sababtoo ah waa inaan wax badan ka baranaa hip-hop. Markii aad baartid waxay hip-hop micnaheeda tahay, kuuma sheegayaan micnaha dhabta ah," London ayaa yiri. "Waa inaad barataa oo Aad ka waaya arag qaadataa naftaada."

"Waan jeclahaya taariiqda Madowga, iyo dadka Madowga ayaa abuuray hip-hop," Jase ayaa tiri. "Marka, waan jeclahay imaanshaha barnaamijka. Waan jeclahay wax ka barashada hip-hop. Dhabitii way fiicantahay."

Sida waafaqsan Maamule Mountain, barnaamijka wuxuu rajeynayaa in lagu dhiirogaliyo dugsiyada kale inay abuuraan goobo waxbarasho gaar ah kuwaaso kobciya hal abuurnimada iyo waxbarashada ardayda.

"Yoolka ayaa ah dhiirogelta dugsiyada kale inay ka fakaraan manhajkooda iyo waxa laga yaabo inaad bixin kartid," ayuu yiri. "Waxaa laga yaabaa inaysan noqon barnaamij hip-hop laakin wax kicinayo rabitaanka ardayda ee inay si qoto dheer leh u galaan maadada ay baranayaan."